



Soo koobidda Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta G1/G2
PPS Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari (Southeast) ee Jiilaalka 2022
Maarso 2, 2022

Ilaha Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta G1

- [Khariiradda Guud](#)
- [Buugga khariidadda ee beddelka soohdinta dugsiga hoose](#)
- [Buugga khariidadda ee beddelka soohdinta dugsiga dhexe](#)
- [Nuxurka Tirakoobka](#)
- [Jaantuska qaabka gudbinta dugsiyada](#)
- [Cabbirka Saameynta Sinaanta Jinsiga](#)

Ilaha Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta G2

- [Khariiradda Guud](#)
- [Buugga khariidadda ee beddelka soohdinta dugsiga hoose](#)
- [Buugga khariidadda ee beddelka soohdinta dugsiga dhexe](#)
- [Nuxurka Tirakoobka](#)
- [Jaantuska qaabka gudbinta dugsiyada](#)
- [Cabbirka Saameynta Sinaanta Jinsiga](#)

Isbeddelada Barnaamijka Xulashada Diirad-saarista

Laba Luuqad Wax-ku-barshada iyo Goobaha Creative Science School iyo qaababka u gudbinta dugsiyada ee Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta G waa sidan soo socota:

- **Creative Science School (CSS) ayaa dib loogu raray Bridger isagoo ah K-8.** Muddada dhow CSS-ta jirta waxay ku biiri doontaa barnaamijka xaafadda Bridger. Qaabeynta diiwaangelinta la saadaaliyay ee 2025-26, waxa la qiyaasayaa in ku dhawaad kala badh dugsiga lagu qori doono bakhtiyaanasiib halka badhka kalena lagu qori doono ardayda ku nool aagga dugsiga. Qeybta bakhtiyaanasiibka waxa loogu talagalay inuu agagaarka ka diiwaangeliyo arday ka badan kuwa meelaha fog, iyadoo lagu qaatay hababka diiwaangelinta ee hadda jira ee Creative Science School. Macquulnimada diiwaangelinta CSS waxa hagaajin kara degmadu si ay u taageerto yoolalka diiwaangelinta CSS iyo dugsiyada u dhow.
- **Isbaanishka DLI ee heerka K-5 wuxuu ku yaalaa Lent (dugsiga oo dhan) iyo Atkinson (goob horay ay iskula yaaleen) Labaduba waxay u gudbiyaan Harrison Park.** Barnaamijka DLI ee hadda jira ee Isbaanishka waxaa ku biiray barnaamijka laba-dhinaclaha ee hadda ku yaal Bridger. Lent waxay u baddelmaysaa qaabka waxbarashada Isbaanishka DLI ee dugsiga oo dhan oo leh aagga dugsiga. Ardayda dhigata barnaamijka xaafadda Lent waxaa lagu soo dhaweyn doonaa inay ku biiraan barnaamijka Isbaanish DLI ama waxay isticmaali karaan ikhtiyaarka ah inay doortaan dugsiga xaafadooda u dhow. Ujeedada falanqayntan, dhammaan xaafada Lent iyo ardayda DLI waxaa lagu meeleyay Harrison Park MS, taasoo la macno ah ardayda u soo guura Barnaamijka xaafadda oo dhan ee Marysville waa laga sooci

doonaa kooxdaas dugsi dhexe. Haddii kale, ardayda aan DLI Lent ahayn waxay aadi karaan Kellogg iyaga iyo kooxdooda Marysville, taas oo kor u qaadi doonta diiwaangelinta Kellogg oo hoos u dhigi doonta Harrison Park. Barnaamijka DLI ee Isbaanishka ee Atkinson ayaa weli sii ahaanaya sida uu ahaa. Tani waxay keenaysaa qeybsanaanta u gudbinta Atkinson, iyada oo barnaamijka xaafada u gudbinayo Kellogg.

- **Shiinayska DLI ee heerka K-5 wuxuu sii ahaanayaa Clark (oo hore u ahaan jiray Harrison Park) iyo Woodstock, ee goobtooda qaab wadaaga ee horay u jirtay. Labaduba waxay u gudbiyaan Kellogg.** Barnaamijka Clark waa hal-dhinac barnaamijka Woodstock-na waa laba-dhinac. Tani waxay keenaysaa kala qaybsanaanta u gudbinta ee Woodstock iyo Clark labadaba, iyadoo barnaamijyada xaafadooda ay u gudbinayaan Lane iyo Harrison Park, siday u kala horreeyaan.

Isbaddelada barnaamijka U gudbinta Xaafadda ee Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta G1


Waxa jira afar isbeddel oo qaabka u gudbinta dugsi hoose-ila-dhexe ah oo ku jira Qabyo-qoraalka Soo jeedinta G, kuwaas oo kala ah:

- **Xaafada Atkinson K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Kellogg.** Tani waxay ka caawinaysaa dhimista luminta Lent iyo Creston. Xulashadani waxay keeni doontaa kala qeybsanaanta u gudbinta Atkinson ee u dhaxeysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka Isbaanishka DLI, maadaama barnaamijka Isbaanishka DLI uu u gudbin doono Harrison Park.
- **Xaafada Vestal K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Harrison Park.** Tani waxay gacan ka geysan doontaa abuurista diiwaangelinta buuxda ee Harrison Park waxaanay boosas ka baneyn doontaa Roseway Heights MS iyo u beddelisteeda mustaqbalka ee dugsiyada K-8 ee gobolka.
- **Xaafada Woodstock K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Lane.** Tani waa si kor loogu qaado diiwaangelinta Lane.
- **Xaafada Creston K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Hosford.** Tani waa in laga caawiyo dhimista lumitaanka xaafadda Woodstock ee Hosford.

Isbaddelada barnaamijka U gudbinta Xaafadda ee Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta G2

Waxa jira afar isbeddel oo qaabka u gudbinta dugsi hoose-ila-dhexe ah oo ku jira Qabyo-qoraalka Soo jeedinta G, kuwaas oo kala ah:

- **Xaafada Vestal K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Harrison Park.** Tani waxay gacan ka geysan doontaa abuurista diiwaangelinta buuxda ee Harrison Park waxaanay boosas ka baneyn doontaa Roseway Heights MS iyo u beddelisteeda mustaqbalka ee dugsiyada K-8 ee gobolka.
- **Xaafada Woodstock K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Lane.** Tani waa si kor loogu qaado diiwaangelinta Lane.
- **Xaafada Creston K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Hosford.** Tani waa in laga caawiyo dhimista lumitaanka xaafadda Woodstock ee Hosford.



Sawirka naqshada u gudbinta ee Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta G2. Sawirka sida buuxda u muuqda ee kor ku linkiyaysan.